



waxaad sheegaysid oo aad dadka ugu yeeraysid waa wax fiican, ee noo sheeg dambiyadii aanu galay wax naga guda

Ibnu Cabaas Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey inuu yiri: Dad ka mida mushrikiinta, ayaa dil badan gaystay, sinadana badsaday, waxayna u yimaadeen Rasuulka scw waxayna ku dheheen: waxaad sheegaysid oo aad dadka ugu yeeraysid waa wax fiican, ee noo sheeg dambiyadii aanu galay wax naga guda, markaasaa waxaa soo dagay: {kuwa aan Ilaahay cid kale la baryin ee aan dilin naf Ilaahay dilkeeda xarimay in xaq lagu dilo mooyee, ee aan sinaysan} [suuratu-furqaan:68], waxaa kaloo soo dagay: { ku dheh Adoomadaya naftooda ku xad gudbayow, ha ka quusanina naxariista Ilaahay} [suuratu sumar:53].

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rag mushrikiinta ka mid ah ayaa u yimid Nabiga scw waxayna gaysteen dilal badan iyo sino, waxay ku dheheen Nabiga scw: diinta aad dadka ugu yeeraysaa iyo waxa laga baranaayo waa wax fiican, laakiin ka waran muxuu yahay xaalkayagu iyo wixii aanu soo falnay ee ah, shirki iyo dambiyoo waawayn, ma leeyihiin wax kafaaro gud ah?. Waxaa soo dagay labada aayadood, taasoo Ilaahay kaga aqbalay dadka towbadii iyagoo sameeyey dambiyoo badan oo waawayn, hadayna sidaas dhici lahayna waxay ku sii jiri lahaayeen gaalnimadooda iyo kibirkooda mana soo galeen diintaan.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65071>

